



Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliska Minneapolis

Tirada:
9-300

Majallada 9aad – Siyaasadaha Dhaqangelinta

Waarannada

9-302 **Waarannada xidhitaanka**

(04/08/22)

Dib u eegis lagu sameeyay siyaasadihii hore: (06/12/02) (06/19/02)

A. Mabaadi'da Sharci

Sida waafaqsan P&P 5-102:

1. "Saraakiishu waa in aanay qofna xidhin ama aanay baarin goob kasta marka laga reebo waaran maxkamadeed ama halka xadhiga ama baadhista noocaas ah lagu ogolaado amar la'aan sida hoos timaada shuruucda Maraykanka."
2. "Shaqaaluhu si bareer ah uma xaddidi karaan xorriyadda shakhsiga, hadday tahay xadhig ama haynta, taasoo ka soo horjeeda dastuurka iyo shuruucda Maraykanka iyo Gobolka Minnesota."

B. Ku adeeg Minnesota gudaheeda

Saraakiisha MPD waxay ku adeegi karaan waarranada gudaha Gobolka Minnesota.

C. Xaqijiiji waarranka

1. Saraakiisha la xidhiidha qofka looga shakisan yahay in lagu raadiyo warqad waaran waa in ay xaqijiyaan in waarranku ka jiro dhanka MECC.
2. Haddii waarranku ka yimid gobolka dibaddiisa, saraakiishu waa inay lambarka warqadda ka helaan MECC oo ay siiyan shaqaalaha HCADC.

D. Sawirada qofka laga shakisan yahay ama xaashida warbixinta kooban

Haddii la heli karo, sawirada qofka laga shakisan yahay ama xaashida warbixinta kooban waa in la helaa ka hor inta aan la gudbin waaranada dembiga ama marka la isku dayayo in la codsado amarka xariga

E. Ku Dhawaaq Xariga oo Ogaysii la beegsadaha Waaranka

Sida uu dhigayo qaybta sharciga MNee ee qodabka 629.32 and P&P 5-301, sarkaalku waa inuu ku wargeliyaa qofka la beegsanayo in sarkaalku ku shaqaynayo amarka, waana inuu tuso la beegsadaha waaranka haddii la codsado. Qabashada uu sameeyo sarkaalka ku shaqeeya amarka waa sharci in kasta oo sarkaalku aanu gacanta ku hayn warqadda waaranka wakhtiga la xidhayo, laakiin haddii qofka la xidhay uu sidaas codsado waa in waaranka qofkaas la tusiyaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah. Sarkaalku si sharci ah ayuu qofka u xidhi karaa marka uu kula taliyo sarkaalka kale ee nabadeed ee gobolka in amar laga soo saaray qofkaas.

Fiiro gaar ah: Sarkaalku wuxuu ku tusi karaa waaranka isagoo isticmaalaya kombayutarka Gaariga ku xidhan.

F. Istimcaalka Xoog si loo Soo Xiro

Xoog waxaa loo istimcaali karaa oo kaliya in lagu xiro si waafaqsan P&P 5-300, iyo federaalka, gobolka iyo sharciyada maxalliga.

G. Adeegga Wakhtiga xadhiga Waaranka

1. Waaran xadhig fal-danbiyeed

Sida uu qabo sharciga MN ee qodabka 629.31, xadhiga gaf waxa la samayn karaa oo keliya saacadaha 8:00 subaxnimo iyo 10:00 pm fiidnimo iyo maalmaha Isniinta ilaa Sabtida, iyada oo ku xidhan marka laga reebo waxyaalaha hoos ku xusan:

- a. Xaringga fal-damibiyeedka waxa la samayn karaa Axadda ama inta u dhaxaysa 10:00 p.m. iyo 8:00 subaxnimo maalin kasta oo kale marka garsooruhu ku amro waaranka in xadhiga la samayn karo inta u dhaxaysa saacadahaas; ama
- b. Marka qofka ku magacaaban warqada waaranka laga helo waddo dadweyne ama waddo

2. Waarannada Fal-danbiyeedyada waawayn iyo kuwa yar-yar

Sida ku cad qodobka dastuurka MN 629.31, xidhitaanka dembi culus ama fal-damibiyeed weyn waxa la samayn karaa maalin kasta iyo wakhti kasta oo habeen iyo maalin ah.

H. Gaadiidka

Haddii uu jiro waaran ka dhan ah shaqsiga, tuhmanaha waa in loo qaadaa Xarunta lagu Xidho Dadka Waaweyn ee Degmada Hennepin (HCADC).

I. Howlgellinta Waaranka- Eedaymo Dheeri ah

Saraakiisha soo xiraya tuhmanaha oo sidoo kale haysta warqado waaran oo wali taagan, waxa ay tuhmanaha uga baaraandegi karaan waaranka iyo dembiga dheeriga ah labadaba.